



Tulariimiya (Tularemia)

Waa maxay tulariimiya?

- Tulariimiya waa cudur uu keeno bakteeriyada *Francisella tularensis* oo saameyn karta xayawaanka iyo bini'aadanka. Qiyaastii 200 oo dhacdo oo ah tulariimiya ku dhacday bini'aadan ayaa la soo sheegaa sannad kasta gudaha Maraykanka. Qaniinyada shilinta cudureysan iyo gacmaha oo lagu taabto oo looga shaqeeyo bakayle cudureysan ayaa sabab u ah kiisaska tulariimiya intooda badan gudaha Maraykanka. Haddii tulariimiya si kas ama ogaan ah loo sii daayo, sida dhacdo ah argagixiso biyooloji, waxay u badan tahay in bakteeriyada lagu sii dayn doono hawada si loo neefsado.

Sidee aya tulariimiya ku fidaa? Waa maxay astaamuhu?

- Waxa aad tulariimiya qaadi kartaa marka aad taabatid xayawaanka qaba cudurka, adiga oo cunaya ama cabaya cunto ama biyo ku wasakheysan cudurka ama adiga oo neefsada siigo ama wax la buufiyay oo uu ku jiro cudurku. Tulariimiya kuma fida qof-ka-qof ama qofku ma qaadsiiyo qof kale.
- Iyada oo ku xidhan sida ay kuu soo gaadhay, waxay tulariimiya u dhici kartaa dhawr qaab:
 - Caabuuq ah sambabada (nooca sambabada) — ayaa ah nooc ugu badan waxana keena bakteeriyada oo la neefsado taasoo soo maraysa neefsashada siigo ama wax hawada lagu buufiyay oo wata cudurka.
 - Qanjidhada limfiga (lymph glands) ee qoorta oo balaadha iyo barar ah cunaha — ayaa badanaa dhaca ka dib marka la liqo cunto ama biyo sita cudurka.
 - Qandhida limfiga oo barara oo leh ama aan lahayn boog maqaarka ah — ayaa dhaca ka dib qaniinyada shilin cudureysan ama xasharaad kale oo qaniinyo leh sida dukhsiga deerada.
- Dhammaan noocyada cudurka waxa la socda astaamo u eg kuwa hargabka ama infiluwersaha (fuluuga), sida qandho, qadhqadhyo, madax-xanuun, juucjuuc jidhka ah iyo tababar-dari badanaa jirta saddex ilaa shan maalmood ka dib soo-gaadhista bakteeriyada. Qofka qaba nuumooniya (pneumonia) waxa uu yeelan karaa laab xanuun, neefsashada oo dhib ah iyo hawlgab neefsasho.

Talaabooyinka looga hortago

- Haddii aad qabtid astaamaha, fadlan sida ugu dhakhsaha badan ula tasho bixiye daryeel caafimaad. Haddii aad aaminsan tahay in si kas ama ogaan ah lagu soo gaadhsiiyay tulariimiya, waa inaad isla markiiba la xidhiidhid saraakiisha fulinta sharciga.
- Haddii ay dhacdo inuu ku soo gaadhay tulariimiya, waxa laga yaabaa in lagu taliyo daweyn ah antibiyootiko si looga hortago caabuqa. Wakhtigan ma jiro tallaaf la heli karo oo ah isticmaal guud.

Daweynta tulariimiya

- Daweyn goor hore ah oo lagu sameeyo tulariimiya iyada oo la isticmaalayo antibiyootiko haboon waa muhiim. Antibiyootikada waa in la isticmaalo si looga hortago ama loo daweyo tulariimiya kaliya marka uu maareynayo bixiyahaaga daryeel caafimaad ama waaxda caafimaadka ee degmada.



PO Box 47890
Olympia, WA 98504-
7890

Bogga Internetka:
www.doh.wa.gov

360-236-4027
(800) 525-0127

DOH Pub 821-025
Somali